JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

# XEERKA LAHAANSHAHA DHUL-BEEREEDKA JSL
# XEER LR.08/1999

**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**

*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

Sheeleiyaqia
file

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT.

REF JSL/M/DEC/222-023/42000

DATE 16 April 2000

## DECREETO MADAXWEYNE NO:23/2000

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu arkay: Qodobka 82aad ee Dastuurka dalka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu tixgeliyey: Ogolaanshihii Golaha Wasiirada fadhigoodii No: 49aad ee 10/8/98- Xeerka Lahaanshaha Dhul-beereedka -.

Markuu helay: Go'aanka No... GW/KF-=8/95/99 ee 11/07/99 ee uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyey xeerka lahaanshaha dhul-beereedka.

**Wuxuu soo saaray**

Dekreetadan lagu baahinayo dhaqan-galka xeer No: 08/99 ee 11/07/1999 ee lahaanshaha Dhul-beereedka.

Allaa Mahad Leh,

Maxamed Ibraahim Cigaal
**Madaxweyne**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Jamhuuriyada Somaliland

**GOLAHA WAKIILADA**

*Xarunta, Hargeysa*

Republic of Somaliland

**HOUSE OF REPRESENTATIVES**

*HQ, Hargeisa*

*Our ref:* GW/KF-8/–95–/99.

*Date:* Mar/–11–07–99ka.

## GO'AAN ANSIXIN XEERKA LAHAANSHAHA DHUL–BEEREEDKA JSL (XEER. LR. 08).–

### GOLAHA WAKIILADA JSL

MARKUU ARKAY : Qodobada 16 (2) iyo 47 ee Dastuurka Jsl.

MARKUU TIXGELIYEY : Soo jeedinta Guddiga Arrimaha Bulshada ee ku saabsan xeerkan.

MARKUU AQOONSADAY : Baahida loo qabo xeer noocan ah oo lagu furdaamiyo mushkiladaha iyo muranka ka abuurma lahaanshaha dhul–beereedka Jsl.

MARKUU WAX KA BEDELAY: Qodobada qaarkood, una habeeyay si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Dalka Jsl.

MARKUU U CODEEYEY : Ansixinta xeerkan, fadhigiisii maanta II/7/99 oo ay goob joog ahaayeen 42 mudane.

Wuxuu cod aqlabiyad ah (30–cod) oo gacan taag ah ku ansixiyay xeerka lahaanshaha dhul–beereedka Jsl (Xeer Lr. 08), halka 6 Mudane ka diiden 5 Mudene oo kalena ka aamuseen, Guddoomiyuhuna aanu cod bixin sida caadada ah.–

(Axmed Maxamed Aadan)
–GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADDA–

(Maxamed Xuseen Cismaan)
–XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILADDA–

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADA

XEER/LR.08/99. Har/ M/M.

## XEERKA LAHAANSHAHA DHUL-BEEREEDKA

GOLAHA WAKIILADA

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY: | Qodobada 16 (2) iyo 47 (1) &14 ee Dastuurka JSL. |
| MARKUU DHAGAYSTAY: | Soo jeedinta Guddiga bulshada ee Goluhu soo Bandhigeen ee ku saabsan xeerkan. |
| MARKUU KU QANCAY: | Baahida loo qabo xeer noocan ah oo lagu fardaamiyo mushkiladaha iyo muranada ka abuurma lahaanshaha dhul beereedka. |
| MARKUU U HABEYEY: | Si waafaqsan shareecada Islaamka, Dastuurka iyo caqlifa fayow. |

## WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QODOBKA KOWAAD

**QEEXID =** Erreyada hoos ku qoran waxa loola jeedaa sidan socota.

**Dhul beereed=** Waxa loola jeedaa dhul kasta oo ku haboon in wax laga beero.
**Lahaansho=** Waxa loola jeedaa lahaanshaha dhul beereed.
**Mulkiyad=** Waxa loola jeedaa warqadda lagu cadeynaayo Xaqa la-haansha dhul beereedka.
**Wasiir=** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Beeraha
**Xeer Nidaamiye Dawladeed=** Waxa loola jeedaa xeer-nidaamiyaha Dawladeed ee lagu fasili doono laguna fulin doono Sharcigan.
**Qoys=** Waxa loola jeedaa xees ka kooban nin iyo haweenaydiisa iyo carruurtooda aan qaan-gaadhin.
**Shirkad=** Waxa loola jeedaa dad isku darsaday hantidooddii, gashanaya dhul beereed.
**Masuul=** Waxa loola jeedaa madaxa qoyska beerta ku nooL,
**Rusqad=** Waxa loola jeedaa qofka beerta qabsaday inta aan la siin mulkiyadeeda.

## Qod. Labaad
## LAHAANSHAHA DHULKA

Iyadoo la tixgelinaayo sida uu qorayo sharcigan la-haanshaha dhul-beereedka Jamhuuriyada Somaliland, ha la lahaado ama yaan la lahaan guud ahaan dhulka waxa ka masuul ah Dawladda qofku wuxuu yeelanayaa dhul beereedka marka la siiyo mulkiyadda.

## QODOBKA SADEXAAD

## MAAMULKA DHULKA

Wasiirka wasaaradda beeruhu wuxuu awood u leeyahay kormeeridda Dhul beereedka, isagaana dawladda uga masuul ah maamulka dhul beereedka.

## QODOBKA AFRAAD

## BIXINTA MULKIYADDA

Marka waaxda dhulka iyo biyaha ee Wasaaradda Beeraha iyo deegaanku ay soo diyaariso mulkiyadda waxa loo gudbinayaaWasiirka Beeraha isagoo hubinaaya lahaanshaha kadibna oggolaanshaha bixinta mulkiyadda ku soo celinaya waaxda dhulka ee Wasaaradda Beeraha si ay u dhamays-tiraan diiwaan gelintabeerta.

## QODOBKA SHANAAD

## DHULKII HORE LOO HAYSTAY

1. Dadkii hore dhul beereedka u lahaan jiray waa in mulkiyada waydiistaan Wasaaradda Beeraha sanad gudihii laga bilaabo taariikhda sharcigani dhaqan gali, si dhulka ay haystaan loogu diiwaan geliyo.
2. Dadka diiwaangalin waaya dhul beereedkooda mudada kor ku xusan waxa la ganaaxayaa marka koowaad 50.000/=sh.SL. Marka labaadna 100.000/=sh.SL. intaa dabadeed way waayayaan ruskhadda.
3. Dhul beereedka la siinayo shirkad, Iskaashato iwm waxa lagu qeexayaa xeer gaar ah.-



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

## QODOBKA LIXAAD

## NIDAAMKA BIXINTA MULKIYADDA

1. Qoys ama qof kastaa waxaa dhulka cusub loo siin karaa hal mulkiyad oo keli ah.
2. Dadkii hore beero u haystay waxa la siinayaa kolba inta mulkiyadooda ee uu yeesho dhulkoodu.

## QODOBKA TODOBAAD

## BAAXADDA UU YEELAN KARO DHULKA LA BIXINAAYO

1. Baaxadda dhul beereedka cusub ee mulkiyad la siinayo qof ama qoys ee ugu saraysaa (Maximum) waa 8 hektar dhulka roob-falatada ah, 4 hektar dhul waraabka ah.
2. Baaxadda dhulka roobka falatada, ee kor ku sheegay kuma saabsana beeraha dawladda, dawladda Hoose, wakaaladaha madaxa bannan iyo shirkadaha.

## QODOBKA SIDEEDAAD

## LA WAREEGIDDA DHULA DAN GUUD AWGEED

1. Dhul kasta oo beeran ama la beeri jiray waa lala wareegi karaa danta guud awgeed.
2. Dhul beereedka dan guud awgeed loola wareego cidii lahayd waa in loo magdhabaa, muddo saddex bilood gudahood ahna lagu siiyo magdhow u dhigma dhul beereedka lagala waregay.

## QODOBKA SAGAALAAD

## WAXYAABAHA KA REEBAN MULKIYADA DHULKA

1. Mulkiyadda dhulka lagu bixiyo waxaa ka reeban in uu seero ka dhigo.
2. Mulkiyadda dhulka cusub lagu bixiyey waxaa ka reeban in la iibiyo muddo saddex sanno ah, muddadaas kadib waa la iibin karaa marka oggolaansho laga helo Wasaaradda Beeraha.

## QODOBKA TOBNAAD

## XUQUUQDA UU LEEYAHAY QOFKA DHULKA QODAYAA

## QOFKA DHULKA QODOYAA WAXA UU XAQ U LEEYAHAY

1. In dhulka uu beero waxna ka soo saaro.
2. In uu beerta qiimaheeda amaah ahaan kaga qaadan karo lacag ahaan Bankiyda dalka.
3. In uu lacagta ku baxday beerta iyo wixii la xidhiidha haddii ay debadda ka timid, inuu xaq u yeelan karo in lagu dhaqo sharciga lacag gelinta oo xaq u siinaya in qaar ka mid ah faa'iidada ka helo beerta inuu debadda u diran karo.
4. Dhul beereedka wuu iibin karaa, kireyn karaa xataa waanu wareejin karaa marka laga reebo tan ku xusan qodobka 9'aad.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QODOBKA KOW & TOBNAAD

## WAAJIBAADKA SAARAN QOFKA DHULKA QODAYA

Qofka dhulka qodaya waxa saaran waa jibaadka hoos ku qoran;

1. In aanu dhulka u isticmaalin si ka duwan shuruudihii lagu siiyey.
2. In uu dhulka u falo sida ugu fiican isagoo kordhinaya wax soo saarka.
3. In uu siiyo haddii ay jiraan shaqaalaha u shaqeeya mushahar u qalma shaqadooda sida uu qorayo shatciga shaqaalaha dalka u yaala.
4. In uu bixiyo cashuurta dhulka ee lagu sheegay sharcigan ama kuwa uu qori doono xeer nidaamiye dawladeed,

## QODOBKA LABA & TOBNAAD

## KA QAADIDA MULKIYADA

Waxaa qofka mulkiyadda dhulka looga qaadi karaa markii lagu helo sababahan soo socda; -

1. Markii ay dawladdu dhulka la wareegto sida uu qorayo qodobka 8'aad ee sharcigan.
2. Markii qofka dhulka la siiyay ka soo bixi waayo shuruudaha lagu siiyey mulkiydda, laba ganaax ka dib.
3. Marka qofka dhulka la siiyey uu sharcigan ama xeer Nidaamiyihiisa ku xaq gudbo laba ganaax ka dib
4. Marka qofku dhulka qodiwaayo saddex sanno oo isku xiga laga bilaabo taariikhdii mulkiyadda la siiyey.

## QODOBKA SADEX & TOBNAAD

## DHAXAL

1. Marka uu dhinto qof mulkiyadda dhulka la siiye, mulkiyadda dhulka waxaa ku wareegaysaa dadka dhaxalkiisa leh sida shareecadda Islaamku weexayso.
2. Markaas oo kale diiwaanka dhulka ayaa lagu qorayaa dadka dhaxalka u helay mulkiyadda dhulka sida qorayo sharcigan.

## QODOBKA AFAR& TOBNAAD

## CASHUURTA IYO KHARASHKA KALE

## BIXINTA CASHUURTA

1. Qof kasta oo dhulka ku dhaqma waxaa waajib ku ah in uu bixiyo cashuurta dawladda.
2. Cashuurta dhulka waxaa loo eegi doonaa sida beerugu u kala weyn yihiin iyo nooca ay kala yihiin.
3. Shuruudaha bixinta cashuurta iyo habka lagu bixinaayo waxa lagu sheegi doonaa xeer nidaamiye dawladeed.

## QODOBKA SHAN & TOBNAAD

## KHARASHKA LAGU HAGAAJINAYO DHULKA

Dhulka mulkiyadda lagu bixiyey haddii ay hore u hagaajisay dawladda Hoose, ama wakaaladaha madaxa bannaan, kharajka waxa bixinaaya qofkii mulkiyadda dhulka la siiyey.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR ... OFFICE

## QODOBKA LIX & TOBNAAD

## DIIWAAN GELINTA DHULKA

1. Wasaaradda Beeraha waa in ay leedahay khariidad tilmaameed iyo diiwaan ku saabsan dhulka beeraha oo lagu qorayo dadka dhulka la siiyey magacyadooda iyo shuruudaha lagu siiyey mulkiyadda dhulka.
2. Wakiilka degmo walba u jooga Wasaaradda Beeraha wuxuu diiwaan gelinayaa dhulka beeraha degmada ku yaall.
3. Iyadoo la tixgelinayo sharcigan wixii lagu qorayo diiwaanka dhulka waxa saldhig u noqonaya mulkiyadda dhulka.
4. Marka la ogolaado wixii lagu qoray diiwaanka dhulka, qofka dhulka leh waxa la siinayaa shahaado muujinaysa wax allaale wixii ku saabsan dhulka mulkiyadda loo siiyey.
5. Wakiilka Wasaaradda Beeraha u jooga degmada wuxuu ugu dambeyntii u gudbinayaa Wasaaradda Beeraha nuqul ku saabsan caddeynta beerta.

## QODOBKA TODOBA & TOBNAAD

## KALA XADAYNTA DHUL BEEREEDKA & DHUL DAAQEENKA

1. Dhul daaqeenka JSL, lagama bixin karo beer-roobaad.
2. Beer biyood wa laga bixin karaa dhul daaqeenka haddii aanay xidhayn ama wax u dhimayn waddooyinka xooluhu ka arrooraan ama/iyo sabada ceelasha ee xooluhu joogsadaan

## QODOBKA SIDED &TOBNAAD

## CIQAABTA

Waxa lagu faahfaahinayaa xeer nidaamiye Dawladeed.

## QODOBKA SAGAAL & TOBNAAD

## AWOOD

Maxkamadda sharciga ah ayaa awood u leh inay qaadaan dacwooyinka ku saabsan sharcigan.

## QODOBKA LABAATANAAD

## XEER NIDAAMIYE DAWLADEED

## MADAXWEYNAHA JAM. SOMALILAND

Wuxuu awood u leeyahay in uu soo saaro xeer nidaamiye dawladeed oo lagu faahfaahin doono sharcigan isaga oo tixgelinaya talada u soo jeediyay Wasiirka Wasaaradda Beeruhu.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QODOBKA KOW & LABAATANAAD

## TIRTIR

Waxa la tirtirayaa sharci kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin sharcigan; marka laga reebo shareecadda Islaamka iyo Dastuurka.

## QODOBKA LABA & LABAATANAAD

Sharci gani wuxuu dhaqan gelayaa marka Madaxweynuhu saxeexo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda, ansixinta Baarlamaanka dabadeed

ALAA MAHAD LEH

(Max'ed Xuseen Cismaan)

XOGHAYAHA GUUD GOLAHA WAKIILADA

(Cabdi/dir X. Ismaaciil Jirde)

KS. GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADDA JSL



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE